

Guriga furan ee mashruuca Laamiga & Badbaadada ee Roosevelt and Pinehurst Way NE

Febraayo 12, 2025



Dulmarka Mashruuca

Waxaan dib u hagaajinaynaa Roosevelt Way NE iyo Pinehurst Way NE inta u dhaxaysa NE 92nd St iyo 15th Ave NE si loogu kordhiyo cimriga wadada 10 ilaa 20 sano. Marka lagu daro dib-u-cusboonaynta Laamiga, waxaanu samayn doonaa hagaajinta kaabayaasha muhiimka ah, sida hagaajinta saldhiga wadada, rakibida jaranjarooyinka daboolaya heerarka ADA (Xeerka Naafada Maraykanka), iyo hagaajinta hababka Biyo mareenka.

Ka sokow soo celinta kaabayaasha, mashruucu wuxuu sidoo kale raadin doonaa habab lagu hagaajinayo tas-hiilaadka noocyada kala duwan ee gaadiidka, iyadoo la raacayo **siyaasaddayada Wadooyinka Dhameystiran**. Dib u cusboonaysiinta suurtagalka ah waxaa ku jiri kara waddooyin isgoys oo cusub, waddooyin baaskiil oo la cusboonaysiiyay, iyo joogsiyada baska oo la hagaajiyay. Isbeddelladani waxay ujeedadoodu tahay inay aaga ka dhigaan mid amaan ah oo dadka oo dhan ay heli karan.

Warbixinta mashruuca

Iyada oo qayb ka ah istaraatiijiyada ilaalinta laamiyada ee socota ee Seattle, mashruucani waxa uu diiradda saarayaa ilaalinta kaabayaasha muhiimka ah iyada oo lagu daraayo horumarinta amniga. Waddadu waxay la kulantay Duugow iyo jeexjeex, saamayn ku yeeshay gaadiidka, lugaynta, iyo safarka baaskiilka. Dib-u-habaynta iyo dayactirka waddada, waxaan hiigsaneynaa inaan ka hortagno burbur kale oo aan hoos u dhigno kharashka dayactirka muddada dheer. Iyada oo wax ka qabanaysa badbaadada iyo isku xidhka marinkan, Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay ka shaqaynaysaa sidii ay u buuxin lahayd himilooyinka lagu sheegay **Qorshaha Gaadiidka Seattle (STP)** iyo **Qorshaha Waxqabadka Aragtida eber**.

Jadwalka Mashruuca

Naqshadayntu waxay bilaabatay jiilaalka 2024 waxaana loo qorsheeyay in la dhameeyo guga 2026. Dhismuhu waxa loo qorsheeyay in uu bilaabmo isla sanadka 2027.



Maanta ka qayb gal!

Wixii macluumaad dheeri ah, sawir Koodhka halkan si aad u booqato shabakadeena Isku qor warsidahayaga si aad ula socotid wararka cusub.

Su'aalaha?

Nagala soo xidhiidh rooseveltpinehurstpaving@seattle.gov

